



## Waa maxay sababta aan u helayo Family Assessment Response (Jawaabta Qiimaynta Qoyska)?

- Department of Children, Youth, and Families (Waaxda Carruurta, Dhallinta, iyo qoysaska) (DCYF) waxaa soo gaaray warbixin ah welwel laga qabo badqabidda ilmahaaga.
- Warbixinta waxaa loo eegayaa qeexidda sharciga dhibaateynta iyo dayacaadda carruurta ee gobolka Washington (RCW 26.44.020).
- Warbixintu ma sheegin in ilmahaagu khatar degdeg ah ku jiro.
- DCYF waxay rabtaa inay kaala shaqeysyo sida aad ilmahaaga ku haysaneyo.



### Yaan la xiriira haddii aan welwel ka qabo kiiskeyga?

Haddii aad cabasho ama welwel ka qabto sida kiiskaaga looga shaqeynaayo, la soo xiriir maamulaha kiiskaaga ka shaqeynaya ee FAR.

Haddii waxa aad ka welweleyso aan weli xal loo helin la xiriir Maamulaha Deegaanka.

Si aad mar kasta caawimaad u hesho waxaad Office of Constituent Relations (Xafiiska Xiriirka Dadweynaha kala) xiriiri kartaa 1-800-723-4831.

-ama-

Waxaad taleefan kula xiriiri kartaa Office of the Family & Children's Ombuds (Xafiiska Wakiilka Qoyska & Carruurta)\* 1-800-571-7321.

\*Xafiiskan uma shaqeyyo xafiiska DCYF. Waxay baaraan su'aalaha laga qabo DCYF.

*Haddii aad jeelaan lahayd koobiyada dokumentigan oo qaab kale ama luqad kale ah, fadlan la xiriir Constituent Relations DCYF (Xiriirka Deegaanka DCYF)(1-800-723-4831 / 360-902-8060, [ConstRelations@dcyf.wa.gov](mailto:ConstRelations@dcyf.wa.gov)).*

DCYF PUBLICATION CWP\_0023 | DSHS 22-1534 SM (07-2021) Somali



## Family Assessment Response (Jawaabta Qiimeynta Qoyska) (FAR)

*Hab la yiraahdo CPS oo lagu xoojiyo laguna taageero qoysaska*



 Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**



## Waa maxay Family Assessment Response ama (Jawaabta Qiimeynta Qoyska) (FAR)?

FAR waa wax ka duwan Adeegyada Difaacidda Carruurta ee Washington (Washington State Child Protective Services) oo waxaa looga jawaabaa qaar ka mid ah dhibaateyn iyo dayacaadda carruurta. FAR ka hor, CPS ayaa sameysa baaris ay jawaab uga bixiso dhibaateyn iyo dayacaadda carruurta.

### FAR WAXAY QOYSASKA KALA SHAQEYSA:

- In ay taaageerto marka ay qalalaaso ku jiraan oo aan waalidka lagu haysan wax dhibaateyn ama dayacaad ah.
- In ay waalidka ku sii xiraan bulshada ay ka soo jeedaan.

### DANBI-BAAREYAASHA IYO DADKA KA SHAQEYEA KIISASKA FAR:

- Waxay qoysaska kala shaqeeyaan badaqabidda carruurtooda.
- Ogaanshaha baahida qoysaska.
- In la dhiso lana xoojiyo arrimaha waalidka iyo bulshada.
- In la helo adeegyo lagu fududeeyo xaaladaha adag ee keeni kara in lala socon waayo baahida carruurta.

### DANBI-BAARISTA:

- In la go'aamiyo haddii carruurta loo geystay dhibaateyn ama dayacaad.
- Aqoonso cidda mas'uul ka ah xadgudubka ama dayacaadda la sheegay. helitaan ku saabsan in xadgudub ama dayac ilmaha loogeeystay. Waxaa qoraalka feylka haysaneysa DCYF, oo wuxuu ku lug yeelan doonaa shaqa-helidda mustaqbalka ee carruurta ama dadka waaweyn ee nugul.

## Sidee bay u shaqeysaa Family Assessment Response (Jawaabta Qiimeynta Qoyska)?

Marka ay warbixin khuseysa qoyskaaga soo gaarto DCYF, qof ka shaqeeya kiisaska FAR ayaa kula kulmi doona si uu kaala hadlo badqabidda carruurtaada.

Qofka kiiska ka shaqeeynaya ayaa kaala shaqeyn doona in la go'aamiyo adeegyada aad u baahan tiihin si loo yareeyo khatarta mustaqbalka imaan karta ee ah dhibaateyn iyo dayacaadda carruurta. Qofka kiiskaaga ka shaqeeynaya ayaa qoyskaaga ka caawinaya wixii caqabado ah.

Badanaaba kiisaska FAR waxaa la xiraa 45 maalmood gudahood. Hase yeesh ee adiga iyo qofka kiiska ka shaqeeynaya ee FAR ayaa kiiska sii wadi kara ilaa iyo 120 maalmood, haddii ay caawimaad u noqneyso in la sii wado adeegyada lagu taakuleynayo hawl fiican oo socota.

### WAXYABAHA AAD KALA DOORAN KARTO:

- Waxaad dooran kartaa inaad ku lug yeelato FAR -ama-
- Waxaad dooran kartaa habka danbi-baarista ee xafiiska carruurta CPS

Haddii aadan qofka kiiska ka shaqeeya ee FAR ku raacsaneyn adeegyada qoyskaagu u baahan yahay, waxaad kulan ka codsan kartaa shaqaalaha FAR si aad ugala hadasho wax kale oo aad dooran karto.

***Qofka kiiskaaga ka shaqeeynaya ayaa qoyskaaga ka caawinaya wixii caqabado ah.***

## Sidee bay ii caawin kartaa Family Assessment Response (Jawaabta Qiimeynta Qoyska)?

Adiga ayaa yaqaan waxa aad u baahan tiihin adiga iyo qoyskaaga. Qofka ka shaqeeya kiiska ee FAR ayaa kula shaqeyn doonaa:

- Noo sheeg sida aad guriga ugu hagaajin karto badqabidda ilmahaaga.
- Samee baahida aasaasiga ah ee qoyskaaga.
- Kordhiso aqoonta kugu caawineysa waalidnimada carruurtaada da' kasta.
- Sameyso xiriir xooggan oo aad la yeelato bulshadaada.
- Raadso macluumaad bulsho iyo dad aad kala hadasho waxyaabaha aad ka welweleyso ee la xiriira guri-helid, shaqo-helid, ama wixii kale oo dhib ah oo culeys idinku keeni kara adiga iyo qoyskaaga.

***Si wadajir ah ayaan u dhiseynaa kalsoonida iyo aqoontaada badqabidda carruurta.***